Si wadajir ah an u taageerno nololwanaagga iyo dugsidhigashada ilmahaaga

Migs Reyes / Pexels

Gurigu waa nawaaxiga koowaad ee uu ilmuhu ku korayo. Waalid kastaa wuxuu u rajeeyaa ilmihiisa nolol wanaagsan iyo fursado waxbarasho. Waalidka taageerada ay bixiyaan iyo firfircoonidoodu waxaay ku leedahay saameyn wayn ilmaha koriinkiisa iyo waxbarashadiisa.

Iskoolka iyo guriga wadashaqaynta dhex taalaa waxay ku salaysantahay kalsooni iyo qalbifurnaan la wadaago. Ka waalid ahaan waxaa kuu wanaagsan in ad ogaato xuquuqahaaga iyo fursadahaaga ad ku saameyn karto waxbarashada ilmahaaga iyo wadashaqeynta guriga iyo dugsiga dhex marta. Waxaa muhiim ah in la iswaydaarto afkaaro iyo khibrado labada dhinacba, sidaasna ilmaha loo taageero.

Qoraalkan jiheeyaha ah ee kooban waxaa la sameeyay iyada oo lagala shaqaynayo waalidiinta iyo shaqaalaha iskoolka. Waxaan rajeyneynaa in aad ka hesho fikrado ad ku garabsiiso ilmahaaga oo ad wadashaqayn dugsiga idinka dhaxeysa ku dhisto. Caalamka dugsiyadu wuu isbadalayaa wuuna horumarayaa, sababtaas darteed ahoow qof jecel in uu xog helo oo haddii aad su'aal ka qabto dugsiga adiga oo dhiiran waydii.

Waalidiinta iyo shaqaalaha iskoolku waxaay ilmaha u yihiin tusaale muhiim ah, sababtaas ayaay aad muhiim ugu tahay in wadashaqaynteenu ay si fiican u socoto oo ay horumarto.

Dugsiga hoose-dhexe ee Finnishka ah

CDC / Pexels

Waxbarista iyo qalabka waxbarashada
Ka qaybqaadashada dugsiga hoose-dhexe waa mid ilmaha lacag la'aan u ah. Qalabka waxbarashada ilmuhu lacag la'aan ayuu dugsiga uga helayaa (qalimaanta, buugaagta wax lagu qorto iyo kuwa wax lagu barto). Qalabka waa in aad loo ilaaliyaa. Qalabka kale sida boorsada iskoolka ama dharka jimicsiga qoysku waa in uu isagu keensadaa.

Cuntada dugsiga
Maalin kasta oo dugsiga uu ilmuhu yimaado wuxuu helayaa hal cunto oo diirran. Dugsigu fiiro gaar ah ayuu u yeelanayaa haddii ilmahaagu uu allerjig cunto ku yahay ama uu cuntooyin gaar ah cuno. Ogaysiiska cuntooyinka baahida gaarka ah waxaad ku buuxin kartaa dugsiga.

Caymiska
Ilmo kasta oo dugsiga jooga caymis ayuu ugu jiraa dhacdooyinka kadiska ah. Caymiskaasi wuxuu ka shaqaynayaa dugsiga, marka uu dugsiga ku sii socdo iyo marka uu ka socdo iyo safarada gaaban ama dalxiisyada dugsiga. Caymisku ma kabayo hantida shaqsiga ah ee ardaydu ay leeyihiin.

Taageerada safarka dugsiga
Haddii safarka dugsigu uu dheeryahay ama ilmuhu uu u baahanyahay in la keeno dugsiga isaga oo lixaad la' darteed ama sabab kale oo carqalad gaar u ah ay jirto waxaa u suuro gal ah uu helo ama kaadh uu ku safro oo lacag la'aan ah ama in tagsi lagu qaado.

Dugsiga waxaa lagu taageeraa waxbarashada ilmaha iyo nololwanaaggiisa

Ilmo kastaa wuxuu u baahanyahay taageero waxbarashadiisa ah, dugsigana waan ku daneynaa in uu ilmahaagu helo baahidiisa waxbarasho iyo dugsidhigasho taagero ku habboon.

Caafimaadka ilmaha
Haddii ilmahaagu uu leeyahay xanuun keeni kara in uu saameeyo nololmaalmeedkiisa, soo ogaysii ilmaha macallinkiisa.

Dhibaateynta iyo takoorka
Sinnaanta macnaheedu waxa weeyaan in dadka oo dhan ay isku qiimo yihiin. Sharciga sinnaanta ee Finland waxaa uu xarimayaa in dadka lagu takooro da', asal, jinsiyad, luqad, diin, wax uu aaminsanyahay, xaalad caafimaad, noocyadiisa jinsiyadeed ama sabab kale oo shaqsigiisa khuseeya.

Ardeygu wuxuu xaq u leeyahay nawaaxi waxbarasho oo amni ah. Dhibaateynta, waxyeellada gacanta ah, cunsuriyadda, ama qashqashaad nooc kale ah kuma bannaana dugsiga. Haddii ilmhaagu uu dareemo in la dhibaateynayo ama la takoorayo, la xidhiidh dugsiga si an wadajir arrinka wax uga qabano oo an xal u helno.

Haddii ilmahaagu uu ka qaybqaatay dhibaateyn markaas xataa waa muhiim in iskoolka wadashaqayn lala yeehso oo lagu garabsiiyo ilmaha falanqaynta arrinka.

Taageero waxbarasho
Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo taagero dhanka waxbarashada ah haddii uu muddo cayiman uu dhib uga dhacay waxbarashadiisa ama uu waxbarashadiisa ugu baahanyahay taageero muddo cayiman ah. Taageerada waxbarashada waxa kaloo la siin karaa haddii uu muddo dheer maqnaanayo. Macallinka ayaa argayda siinaya taageero waxbarashada ah laakiin ardayga iyo waalidkiisana way u bannaantahay inay codsadaan fursadaas.

Taageerada saddexda darajo ah
Carqaladaha waxbarashada iyo helitaanka dhibaatooyinka waxbarashada ee wakhtiga hore iyo qeexidda darajada saxda ah ee taageeradu waxaay muhiim u yihiin waxbarashada ilmaha iyo horumarkiisa in la sugo. Taageeradu waxaay noqon kartaa mid ku meelgaar ah ama mid muddo dheer ah. Kooxda xirfadleyaasha badan ee iskoolka ayaa qiimeynaya baahiyada ilmaha kalana hadlaya waalidiintiisa. Aragtida waalidku waa mid muhiim ah, sababtaas darteed in taageeradago'aan laga gaadho waa wax lagala shaqaynayo waalidiinta.
Taageeradu waa mid saddex darajo leh: taageerada guud, taageerada la xoojiyay iyo taageerada baahida gaarka ah. Taageeradu waxaay isku badbadasahaa kolba baahida iyo xaaladda ilmaha. Ujeedadu waa in la garabsiiyo ilmaha horumarkiisa waxbarasho oo loo sii xoojiyo darajada aqoontiisa waxbarashada soo socota.

Waxbarista u diyaarinta ah
Haddii ilmahaaga aqoontiisa af finnishka ama af swidhishku aanay wali ku filnayn in uu dugsiga hoose-dhexe wax ku barto, ilmahaagu wuxuu ka qaybqaadan karaa waxbarista diyaarinta ah. Waxbarista diyaarinta ah waxaa xaq u leh ardayga 6-17 sano jira.
Waxbarista u diyaarinta ah waxaay soconaysaa hal sano. Muddada lagu jiro sanadkaas ardaygu wuxuu baranayaa af finnish/af swidhish wuxuuna baranayaa dugsiga finnishka ah. Ardayga waxaa loo samaynayaa qorshaha u diyaarinta waxbarashada oo ah barnaamijka waxbarashada. Kooxahaas lagama helo dugsiyada oo dhan.

Waxbarashada finnishka/iswidhishka oo afka labaad ah (waxbarista S2)
Marka ilmaha afkiisa hooyo uunan ahayn af finnish/af iswidhish/af saame oo aqoontiisa af finnishku/af iswidhishku aanay gaadhsiisnayn in uu qaato waxbarashada *afka finnishka/afka ishwidhishka iyo suugaanta* waxaa ardayga loo badhigayaa fursad uu kaga qaybqaato waxbarashada finnishka/iswidhishka oo afka labaad ah (waxbarista S2)
Waxbarista finnishka/iswidhishka oo afka labaad ah waxaa la qaadan karaa ama qayb ahaan ama gabi ahaan iyadoo lagu kabayo waxbarashada afka finnishka iyo suugaanta.

Macallinka ayaa qiimeynaya baahiyada waxbarashada ee ardayga oo u qabanqaabinaya kulan waalidka. Waalidka ayaa go'aanka kama dambayska ah gaadhaya iyaga oo qiimeynaya macallinka talobixintiisa iyo aqoonta iyo baahida ardayga. Marka aqoonta afka finnishku/afka iswidhishku ay horumarto oo ilmuhu uu fursad u helo in uu galo *afka finnishka/afka iswidhishka iyo suugaanta* waxbaristeeda, waxaa la qabanqaabinayaa kulan cusub waxaana la baddalayaa go'aankii hore.

Katerina Holmes / Pexels

Afka hooyo iyo diinta
Dugsiga dhexe ilmuhu wuxuu fursad u haystaa in uu ka qaybqaato barashada afkiisa hooyo iyo diintiisa. Macluumaad dheeri ah waxaad ka heli kartaa dugsiga ilmahaaga.

Barista dabaasha
Aqoonta dabaashu waa xirfad nololeed oo muhiim ah. Waxaay qayb ka tahay waxbarista jimicsiga iyo manhajka waxbarashada. Waxbarista dabaasha waxaa lagu bixiyaa hoolasha dabaasha, macallimiinta dabaashuna waxaay u shaqeeyaan xafiiska dowliga ah ee jimicsiga. Ilmaha waxaa raacaya oo iskoolka kala tagaya macallimad iyo macallin kormeeraya ilmaha inta ay u sii socdaan goobta, inta ay ku jiraan qolka dharka lagu baddasho iyo inta dabaasha la barayo. Dharka dabaasha ee saxda ah waa mid laga sameeyay marada dharka dabaasha ah lugaha ama gacmahana wuu u dheeraan karaa.

Wadashaqeynta guriga iyo dugsiga

Waxaad ka waalid ahaan xaq u leedahay in aad hesho macluumaad ku saabsan waxbarashada ilmahaaga ama carqaladaha ka jira. Haddii ilmahaagu uu u baahanyahay taageero oo loo qorsheynayo noocyo kala duwan oo lagu taageero waxaad xaq u leedahay in aad ka qaybqaadato go'aan qaadashada.

Haddii ad u aragto in aqoontaada afka finnishku aanay kugu filnayn in aad ku gasho wadahadalka ama in ad fahanto, waxaad heli kartaa turjumaan kaa caawiya arrimaha waxbarashada ilahaaga. Waxaa muhiim ah in aan helno fursad an ku wadahadalno anan kaga heshiino si wadajir ah arrimaha la xidhiidha dugsidhigashada ilmahaaga ama nololwanaagiisa. Xataa haddii uu ilmahaagu af finnish fiican yaqaano ma aha wax lagu taliyo in uu turjumaan ka noqdo u adeegidda arrimihiisa.

Jadwalka xiisadaha
Waalidka way fiicantahay in uu hubiyo jadwalka waxbarashada ee ilmihiisa oo uu hubiyo in uu wato qalabka waxbarasho ee maalintaas uu ugu baahanyahay dugsiga. Tusaale ahaan xiisadaha jimicsigu waxaay noqon karaan kuwo gudaha ah ama bannaanka ah. Wakhtiyada biririftana carruurtu bannaanka ayaay joogaan markaasna way wanaagsantahay in laga warhayo in ay carruurtu xidhanyihiin dhar cimilada ku habboon marka uu dugsiga tagayo.

Casharada guriga iyo imtixaanada
Nawaaxiga gurigu saameyn wayn ayuu ku leeyahay nolosha ilmaha waxaana wanaagsan in uu waalidku ku dhiirigaliyo ilmaha ka shaqaynta casharada iyo u akhrisashada imtixaanada. Haddii aqoontaada ama afka finnishka inta ad ka taqaano aanay kugu filnayn inaad tusaale ahaan ka caawiso casharada dugsiga, ka hubi macallinka ilmahaaga in tusaale ahaan kooxaha cashadara lagu qabanqaabiyo dugsiga ama nawaaxiga ad deggantihiin.

Isticmaalka Wilma
Wilmada waxaad ka heli kartaa macluumaad ka socda macallinka oo ku saabsan maalinta dugsiga ee ilmahaagu sida ay ugu dhacday iyo maqnaanshaha. Wilmada waxaa ka imanaya ogaysiisyo muhiim ah dugsiga iyo shaqaaluhu soo dirayaan. Macallimiinta qaar badan oo ka mid ah ma laha lambar si toos ah loogala xidhiidho, sababtaas ayaay muhiim u tahay in la barto isticmaalka Wilma-da. Adigu xataa macallimadda ama maamulaha waxaad uga soo diri kartaa fariimo Wilmada. Talobixin iyo caawimaad ku saabsan isticmaalka Wilma-da waxaad ka heli kartaa dugsiga.

Gabby K / Pexels

Lakulanka macallinka
Macallinka ayaa qaban kara ballan kulan ah oo lagaga wada hadlo arrimaha la xidhiidha dugsidhigashada ilmaha iyo waxbarashadiisa iyo qaabdhaqanka ilmaha. Kulamadaas waxaad ka soo jeedin kartaa welwelada ama waxyaabaha ad rabto in aad sheegto ee ilmahaaga khuseeya.

Fiidadka kulanka waalidiinta
Fiidadka la kulanka waalidiinta waxaa la qabanqaabiya 1-2 mar inta sanad-dugsiyeedka lagu jiro waxaayna noqon karaan kuwo fasalka oo dhan ah ama dugsiga oo dhan ah. Fiidadka waalidiinta waxaa lagugu wargalinayaa arrimaha muhiimka ah ee markaas taagan waxaana lagu siinayaa fursad ad ku barato waalidiinta kale.

Guddiga waxbaqadka fasalka
Waalidku waxaay si wadajir ah u aasaasi karaan guddi waxbaqad oo fasalka ah, taas oo ah qaab wanaagsan oo ay u baran karaan ardayda ilmahooda fasalka la dhigta iyo waalidiintooda. Guddiga waxqabadka fasalku wuxuu tusaale ahaan qabanqaabin karaa dalxiisyo wadajir ah, xaflado iyo fiidad wadasheekaysi ah. Ka qaybqaadashadu khasab ma aha.

Ururka waalidiinta
Waalidka oo dhan ayaa lagu soo dhawaynayaa guddiga waalidka, sababta oo ah qof kasta aqoontiisa gaarka ah iyo xaadir in ay ahaadaan waa muhiim. Ururkaas waxaa ka tirsan oo kale wakiilo dugsiga ka socda. Ururka waalidiintu wuxuu qabanqaabiyaa barnaamijyo kala duwan, dalxiisyo, naadiyo, ciyaaro iyo munaasabado wadahadal ah oo dugsiga oo dhan carruurta ku jira ku socda. Ururuku wuxuu ka qaybqaadan karaa horumarinta waxqabadka dugsiga wuxuuna keeni karaa qaabab cusub oo ay u wada shaqeeyaan dugsiga iyo gurigu.

Guddiga maamulka dugsiga
Guddiga maamulka dugsigu wuxuu qayb ka yahay maamulka dugsiga. Guddiga maamulka waxaa ku jira oo maamulaha dheer shaqaalo iyo waalidiin. Guddiga maamulka xubnihiisa waxaa la doortaa afartii sanoba mar. Shaqada guddiga waalidka waxaa ugu wayn taageerada dugsiga iyo wadashaqaynta wanaagsan iyo ilaalinta nawaaxiga waxbarasho ee amniga ah.

Shaqaalaha dugsiga

Dugsiga ilmahaaga waxaa ka shaqeeya xirfadleyaal kala duwan. Macluumaadka shaqaalaha waxaad ka heli kartaa bogga internetka dugsiga.

Kampus Production / Pexels

Maamulaha dugsiga
Maamuluhu wuu hogaamiyaa, wuu hagaa wuuna kormeeraa shaqada tarbiyadda iyo waxbarista ah ee dugsiga. Waxqabadkiisu waa mid balaashan oo ay ku gudo jiraan tusaale ahaan shaqooyin maamul iyo dhaqaale ku sahabsan. Maamuluhu wuxuu ka jawaabaa amniga iyo isgaarsiinta dugsiga oo dhan.

Xoghayaha dugsiga
Sekreteriga dugsiga waxaad ka dalban kartaa macluumaadka Wilma-da. Intaas waxaa dheer in skereteriga dugsigu ay ku shaqo leedahay dalabaadka gaadiidka dugsiga iyo nidaamka diwaanka ee ardeyda shaqooyinka iyo diyaarinta ku sahabsan. Iyada waxaad ogaysiin kartaa isbaddalada macluumaadka xidhiidhka.

Macallinka
Macallinku wuu barbaariyaa, wuu baraa wuuna hagaa ardayda. Wuxuu ogaysiiyaa waalidka ardayda arrimaha ku sahabsan. Macallinku wuu qiimeeyaa hore u socodka ardayga, wuxuu ka qayb qaataa taageerada saddexda darajo ah qorshayntiisa iyo hirgalintiisa wuxuuna la shaqeeyaa xirfadleyaal badan.
Macallinka fasalku wuxuu la socdaa maqnaanshaha ardayda wuxuuna qaadaa mas'uuliyadda ugu wayn ee wadashaqaynta guriga iyo dugsiga ka dhaxeysa.

Caawiyaha dugsidhigashada
Caawiyaha dugsidhigashadu waa qof kala shaqeeya maallinka fasalka. Wuxuu taageeraa ilmaha waxqabadkiisa madaxbanaanida leh iyo korriinkiisa. Mas'uuliyadda u wayn ee waxbarashadu waxaay saarantahay macallinka

Hagaha luqadaha badan ku hadla
Hageyaasha luqadaha badan ku hadla waxaay waalidka siiyaan macluumaad ku saabsan qaabka uu dugsigu u shaqeeyo waxaayna siyaadiyaan isfahanka dugsiga iyo waalidka. Hageyaadha luqadaha badan waxaay taageeraan wadashaqaynta dugsiga iyo guriga iyo nololwanaagga iyo la qabsiga waddanka ee qoyska oo dhan.
Wakhti xaadirkan hageyaasha luqadaha badan ku hadla ee magaalada Helsinki waxaay ku bixiyaan hagitaan af finnish, af ingiriis, af carabi, af soomali iyo af ruush.

Tababaraha dugsiga
Tababaraha dugsigu wuxuu xaadir u yahay nololmaalmeedka ardeyga wuxuuna ka taageeraa dugsidhigashada iyo nololwanaaga wuxuuna qabanqaabiya waxqabad kala duwan.
Tababaraha dugsigu wuxuu taageeraa bulsho in la ahaa tusaale ahaan kooxaysiga, xalinta muranka, waxbaqadka biririfta iyo waxqabadka naadiyada isaga oo adeegsanaya.
Wuxuu wadashaqayn la sameeyaa macallimiinta, daryeelka ardeyda iyo waalidka.

Daryeelka ardaydu wuxuu taageeraa qoyska
Haddii ilmahaaga ama qoysaagu uu leeyhaay carqalado ama welwel adkaynaya dugsidhigasha ilmaha iyo nololwanaagiisa, waxaad kaalmaysan kartaa macallinka ka sokow daryeelka ardeyda. Daryeelka ardeyda waxaa ku jira sooshalka dugsiga, cilmu-nafsi yaqaanka iyo kalkaalisada caafimaadka.

Sooshalka dugsigu waxa weeyaan khabiir shaqada sooshalka ah oo bixinaya kaalmo marka ilmahaagu uu carqalado kala kulmo dugsidhigashada ama xidhiidhada asxaabta iyo isbaddalada saameynaya nololwanaaga. Haddii qoyskaagu uu u baahanyahay caawimaad ama ad rabto in aad ka sheekeysato arrimaha la xidhiidha arrinkaas, waxaad la xidhiidhi kartaa sooshalka dugsiga. Haddii loo baahdo sooshalka dugsigu waxaay wadashaqayn la samaysaa daryeelka sooshalka ee nawaaxiga, xarunta qoysaska iyo daryeelka caafimaadka ee dugsiga.

Cilmu-nafsi yaqaanku wuxuu ka caawiyaa ardayga dhibaatooyinka waxbarashada, korriinka ku saabsan maamulka dareenka ama dhibaatooyinka culus ee qoyska. Wuxuu sameeya qiimeynto, wuxuu la tashadaa waalidka iyo shaqaalaha dugsiga wuxuuna bixiyaa talobixin. Cilmu-nafsi yaqaanku badanaa wuxuu ku la socdaa shaqaalaha u qorsheynaya ilmaha waxqabadyo taageero ah.

Kalkaalisada caafimaadka Daryeelka caafimaadka ee dugsiga
hiigsigiisu waxa weeyaan in la sugo korriinka caafimaadka leh ee ardeyga lana garabsiiyo awooddisa dugsidhigasho.
Ardaygu wuxuu helayaa latalin dhanka caafimaadka ah iyo hagitaan ku socda baadhitaanada gaarka u ah.

Garabsiinta dugsiga ka baxan

Mararka qaar nolosha waxaa ka dhaca arrimo saameeya nololmaalmeedka qoyska oo dhan. Marxaladahan ilmaha ama/iyo waalidku waxaay u baahan karaan garabsiin dugsiga ka baxsan. Bogga *Perheen tuki* ee magaalada Helsinki ayaa bixinaya macluumaad badan oo qoysaska carruurta leh adeegooda ku saabsan:
http://www.hel.fi/perheentuki

Hagitaanka sooshalka ee qoysaska carruurta leh
waa 0-16 sano carruurta jira qoysaskooda kaalmeyn, hagitaan iyo talobixin loogu talo galay ee marxaladaha kala duwan ee nolosha. Hagaha sooshalka ayaa qoysaska guud ahaan kula kulmaysa guryahooda.
Adeega waxaa laga dalbanayaa *adeega taleefanka ee latalinta sooshalka ee qoysaska carruurta leh tel.* 09 3101 5454 isniin-jimce saacadda 9-12 ama badhanka *Tarvitsen apua* oo loo maro tusaale ahaan bogga sivulla hel.fi/perheentuki.

Waxaad kaalmeysan kartaa hagaha sooshalka ee qoysaska carruurta leh marka

- ad rabto in aad ka hadasho waalidnimada, daryeelka carruurta iyo barbaarintooda arrimaha la xidhiidha tusaale ahaan hurdada ilmaha, jadwalka maalinlaha ah, da'da

madax taaga ee ilmaha iyo dajjinta xuduudaha
- ad rajaynayso kaalmeyn ku sahabsan marxalad nololeed isbaddal wayn oo ku yimidday tusaale ahaan kala tag waalidka ah ama xubin qoyska ka tirsan oo xanuunsada
- ad u baahantahay macluumaad ku saabsan adeegyada iyo hagitaanka nawaaxiga
- ad u baahantahay taageero ama talobixin xalinta arrimaha guud ah

Adeegaasi qoyska waa u lacag la'aan.

Pexels

Qiimeynta baahida adeegga ee qoysaska carruurta leh iyo taageeradooda

Adeeggu wuxuu ku saabsanyahay sharciga daryeelka sooshalka waxaana loogu talo galay ilmaha reer Helsinki ah iyo qoysaskooda ee ay haysato xaalad nololeed oo aad u adag iyo baahi adeeg, oo ayna waliba ku filneyn adeegyada guud iyo kuwa marxaladaha hore. Muddada uu socdo waxaa lala qiimeynayaa ilmaha iyo qoyska iyadoo laga wadashaqaynayo xirdaleyaal badan oo kala duwan baahida adeegga guud, ka gaarka ah iyo baahida badbaadada carruurta.

Waxaa xubnaha qoyska lala kulmayaa iyaga oo wada jooga iyo si gaar ahba 1-5 jeer ugu badnaan saddexdii bilba hal mah, iyadoo qoyska loo fidinayo talobixin iyo taageero iyo kaalmeyn toos ah. Wadashaqeynta waxaa lala sameynayaa ilmaha iyo qoyska xaaladooda xirfadleyaasha yaqaana. Culayska waxaa keeni kara tusaale ahaan korriinka ilmaha dhibaatooyinka la xidhiidha, ilmaha oo calaamado dhib ah yeesha, waalidka oo daala, qoyska oo wadadhaqankoodu dhibaatoodo, balwado qoyska lagu isticmaalo dhibaatooyin dhanka dhimmirka ah iyo waxyaabaha kale ee nolosha saameeya.

Macaamiilku isaga ayaa la xidhiidhi kara qiimeynta baahida adeegga kooxda nawaaxigaas uga mas'uulka ah ama shaqaale ka welwelay xaaladda ilmaha ama qoyska ayaa la xidhiidhi kara. Adeeggaas qoyska waa u lacag la'aan.

Soo xidhiidhidda ku salaysan sharciga daryeelka sooshalka

Ogaysiiska badbaadada carruurta waxaa samayn kara qos kasta oo ka welwelsan ilmihiisa ama nawaaxiga ilmo ku koraya nololwanaagiisa. Ogaysiiska waxaa lagu samayn karaa magac la'aan. Haddii shaqaalaha dugsigu uu arko ama uu ogaado arrimo keenaya in baahida badbaadada carruurta ee qoyska ay wanaagsantahay in laga salgaadho, wuxuu sharcigu dhigayaa in uu waajib ka saaranyahay inay sameeyaan ogaysiiska badabaadada carruurta.

Qiimeynta baahida adeegga ee qoysaska carruurta leh iyo kaalmeyntooda waxaa lagu falanqeynayaa ogaysiisyada badbaadada carruurta iyo sharciga

dareelka sooshalka xidhiidhsamaynta waafaqsan ee toddoba maalmood oo shaqo gudahooda la sameeyay. Falanqaynta natiijadeedu waxaay noqon kartaa in la cabiro in aanan loo baahnayn qiimeynta. Qiimeynta baahida adeega waxaa la saaynayaa saddex bil gudahood marka uu ogaysiiska ama xogta la helo. Isla markaas waxaa la qiimeynayaa inay jirto baahi badbaadada carruurta ah. Muddada qiimeynta baahida adeegga lagu jiro ilmuhu kama aha macaamiil badbaadada carruurta.

Adeegyada magaalada Helsinki iyo Suomi tutuksi oo afaf kala duwan ku baxaya

Haddii ad u sii baahantahay macluumaad dheeri ah oo nawaaxigaaga ah ama degmadaada adeegyadooda sooshalka iyo caafimaadk waxaad la xidhiidhi kartaa dugsiga. Waxaan isku dayaynaa inaan kaa caawino xaaladaha adag anaga oo kugu hagayna adeegyada nawaaxiga ama magaalada.

Adeegyada magaalada Helsinki
Adigu xattaa waxaad ka heli kartaa adeegyo marka aad eegto bogga magaalada Helsinki www.hel.fi. Adeegyada waxaad ka helaysaa macluumaad ku qoran af finnish, swidhish iyo ingiriis.

InfoFinland
Nolosha Finland iyo nidaamka adeegga ee finnishka ah waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah bogga www.infofinland.fi. Macluumaadka waxaad ku helaysaa luqadahan: finnish, iswidhish, ingiriis, ruush, eestoonia, fransiis, somali, isbaanish, turki, shiine, farsi iyo carabi.



RODNAE Productions / Pexels

Jiheeyahan waxaa lagala shaqeeyay samayntiisa barnaamijka Mukana, dugsiga hoose ee Keinutie shaqaalahooda, ardaydooda iyo waalidiintooda. Dhammaantiin waad ku mahadsantihiin wadashaqaynta fiican ee fudud!